VERMONT

Agency of Human Services
Ogaysiiska Dhaqannada Asturnaanta
Ogaysiiskan Wuxuu dhaqan galay Agoosto 20, 2013

FADLAN SI TAXADARLEH U EEG

OGAYSIISKAN WUXUU TILMAAMAYAA SIDA DAAWEYNTA , DAWADA, IYO AASHITADA WARBIXINADA LA XARIIRA, IYO WARBIXINO KALE OO SHAQSIYAN LOO AQOONSANKARO OO KUGU SAABSAN, LOO ISTICMAALI KARO LOONA BIXIN KARO, IYO SIDA AAD KU HELI KARTO WARBIXINTAAN.

FREE INTERPRETER SERVICES ARE AVAILABLE

Fadlan noo sheeg hadii aad doonayso turjibaan ama in lagaa caawiyo aqriska ama fahanka ogaysiiskaan.

Warbixin Caafimaad, Dhaqannada Asturnaanta: **Bogaga 1-3**
Dhaqanno Guud oo Khuseeya Warbixinno Shakhsiyan loo Aqoonsankaro: **Bogaga 4**

"Anaga" waxaan nahay Waaxda Adeegga Bulshada (AHS). AHS waxay ka koobantahay Waaxda Caruurta iyo Qoysaska; Waaxda Dadka Lixaadka la', Waayeelka iyo Kelinoolayaasha; Waaxda Caafimaadka; Waaxda Caafimaadka Dhimirka; Waaxda Dhaqancelinta Sharciga; iyo Xafiiska Helida Caafimaad ee Vermont. Qandaraaslayaasheenna iyo deeqbixiyeyaasheena waxaa ka mid ah adeeg fidiyeyaal soo mara Vermont sida xarumaha waalidka iyo dhalaanka, xarumaha waayeel xanaaneynta, iyo xarumaha caafimaadka dhimirka ee magaalada.

Markii aan kuu fidino adeeg caafimaad iyo mid bulsho, waan helidoonaa warbixin shaqsiyan loo aqoonsan karo (identifying information), iyo mararka qaar warbixin caafimaad, oo adiga kugu saabsan. Sharciyo Faderaal ah iyo kuwa goboleed ayaa nagu qasbaya inaan ilaalinno warbixinta.

Ogaysiiskan wuxuu kuu sheegayaa sida aan us isticmaalikarno ama cidkale ula wadaagikarno warbixintaada caafimaad iyo marka aanan sameynkarin. Waxay kaloo kuu sheegeysaa waxay tahay xaquuqdaadu. Sharciga wuxuu na farayaa inaan ku qasbanahay in ogaysiiskaan aan ku siino. Sharcigaas wuxuu na farayaa inaan ku qasbanahay inaan raacno heshiiska ogaysiiskaan ku xusan ee dhaqangalsan.

DHAQANNADA ASTURNAANTA LA XARIIRA: WARBIXINTA CAAFIMAAD

1. Warbixin caafimaad noocee ah ayay AHS aniga iga haysaa?

Adiga iyo dadkaleba waa ay nasiinkaraan warbixin kusaabsan caafimaadkaaga iyo daryeelkaaga caafimaad markii aad arji u buuxsato helida faa'idada adeegyadeena. Tan waxaa ku jirikara warbixin ku saabsan cuduro lagaa helay, cuuryaanimo ama taagdaro, ama dhayitaan. Waxaa kaloo la jirikara warbixino dhaqaale iyo qarashaad.

2. Warbixino Caafimaad side ah ayay AHS isticmaali ama dadkale lawadaagi kartaa?

Waxaan isticmaalnaa dadkakalena lawadaagnaa warbixintaaada kuwa ugu macquulsan ama ugu muhiimsan una suurta gelinaya shaqaalaheena iyo kuwaan macaamiisha aan la leenahay howshoodu inay u suurtagasho.

3. Goormee ayay AHS isticmaali ama wadaagi warbixintdayda caafimaad?

Waan isticmaalikarnaa ama wadaagikarnaa warbixintaada caafimaad, dhiyida, biilbixinta, ama dayreelo caafimaad oo ay ku jiraan qorsheyn iyo AHS maamulladooda. Tusaale, waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno warbixintaada sababahaan hoose:

- Si loo qiimeeyo inaad u qalanto faa'idada adeegayadan
- Si loo abuuro loona fidiyo adeeg shaqsiyeed qofba kii ku haboon iyo qorshe dhayitaan.

Tusaale, waxaan wadaagikarnaa warbixintaada si qorshe loola sameysto kalkaalisadaada, dhaqtarkaaga, ama qof caafimaadkaaga ka shaqeeyoo kale.

- Si laguu xasuusiyo balamahaaga.
- Si laguugu sheego adeegyo kale ama daaweyno kugu haboon adiga ama qoyskaaga.

- Si loo baxsho qarashka u adeegaaga.

Tusaale, dhaqtarkaaga wuxuu noo soo dirikaraa warbixintaada caafimaad si aan u siino lacagtuu kugu dhayay.
Waxaan kaloo la wadaagikarnaa warbixintaada caafimaad xafiisyakale oo aan macaamilaad la leenahay iyagaana no siin kara dhaqtarkaaga lacagtuu kugu dhayay

- Si ay u bixiyaan howlahaan wadno walibana noogu maamulaan barnaamijyadeena.

Tusaale, waxaan warbixintaada caafimaad u isticmaalikarnaa ama u wadaagikarnaa inaan hubi in dadka ku daryeelaya ay kusiiyaan daryeel heersare ah walibana si dhaqso leh oo saxan lacagtooda loo siiyo. waxaan warbixintaada caafimaad u isticmaalikarnaa ama u wadaagikarnaa inaan ku hubino adoo inaad hesho adeeg saxan oo waliba aan kordhino wanaaga adeega aad hesho.

4. Ma waxaa jira waqtiyo kale oo AHS isticmaasho warbixinteyda caafimaad ama lawadaagto iyadoo aanan u ogolaan?

Waxaa jira waqtiyo kooban oo aan adeegsanno ama lawadaagno warbixintaada ogolla'aantaada. Marmar sharciga ayaa ogol ama naga doonaya in aan sedan sameyno.

Warbixintaada ayaan cid la wadaagi karnaa ogolla'aantaada sababahan shakhsiga ah awgood:

- Xubin qoyska ka tirsan ama shakhsigii aad doorato, oo loo rabo faragelintooda daryeelkaaga ama bixinta qarashka daryeelkaaga.
- Si loo ogeysiiyo qoyskaaga ama ciddii kale ee masuul ka ah daryeelkaaga goobta, xaaladda ama geeri.
- Horjoogaha duugtaada ama baari caafimaad oo u baahan warbixin si uu howshiisa u gutto.
- Magdhowga shaqadaalaha ama barnaamijyada la midka ah.

Waxaa laga yaabaa inaan u isticmaalno aanna shaaca uga qaadno wararka caafimaadka oggolaanshadaada la'aanteed:

- Iyadoo loogu talogalay hawlaha caafimaadka dadweynaha sida uu sharcigu oggolyahay ama u baahan yahayba. Tusaale ahaan, si loo soo tebiyo cudur soo baxay iyo tiro koob, dhalasho iyo dhimasho.
- Iyadoo Cilmi Baaris Loo Adeegsan, loona marayo dhan sharciyo adagi ka yaalaan.
- Ururada raadinta xubin iyo yaboohidda xubin si kaalmo looga geysto yaboohidda xubinta ama unugga iyo ku beeriddiisa kuwa bandhiga.
- Iyadoo loogu talogalay sharciyada ama qaababka maamullada, sida ka jawaabidda amarka maxkamadda
- Kuwa askarta sid sharciyan ah u doonayaan.
- Iyadoo la sheegayo danbi lagu galay xafiiskeena ama shaqaalaheena loo geystay.
- Iyadoo loo sheeegayo jirdil ama daryeelxumo socota masuuliyiinta
- Iyadoo ku socota hay'adda dusha ka eegidda caafimaadka oo loogu talogalay hawlaha uu sharcigu oggolaaday
- Iyadoo Waaxda Caafimaadka iyo Adeegga Bulshada Mareykanka (United States Department of Health and Human Services) markii ay baaris wadaan cadeyn ahaan loo siinayo.
- Si looga hortago khatar caafimaad ama nabadoonaan sare khatarna ku ah shaqsi ama bulshada, ama si askartu u tilmaamaan ama u xiraan shaqsiga cudurka xun faafinaya.
- Si loo bixiyo qeybo ka mida dowlada, sida amaangelinta masuuliyiin dowladeed, arin amaanka wadanka ku saabsan, arimaha militeriga,iyo ciidamo kala duwan oo amaansugida ah markay muhiim tahay arimahay u codsanayaan.
- Wakaalad kale oo maamuleysa barnaamij dowladeed oo bixinaya faa'iido bulsho, oo loo qadarinayo uqalmidda ama ku gelidda warbixinta, iyo si hab wanaagsan la isugu xiro, qoondeeyo loona maamulo barnaamijyada dowladeed ee la xiriira.

Marka laga reebo sababaha lagu xusay wargelintan sharciguna ogolyahay, ma adeegsandoonno ama lama wadaagidoonno cidna ogolaanshahaaga oo qoraal ah la'aantii.

5. Kawarran haddii cid kale eey u baahantahay warbixinteyda caafimaad?

Waad codsan kartaa in warbixintaada lasiiyo cid kale, ama annaga ayaa ogolaansho kuweydiisan karma si aan sidaa u yeelno. Kahor inta eeynan cid la wadaagin warbixinta, waxaa lagaa weydiin doonaa in aad foomka ogolaanshaha saxiixdo. Foomka ogolaanshuhu waxa uu noo sheegayaa macluumaadka aan cid la waadi karno, danta laga leeyahay wadaaga, iyo aqoonsiyada dadka aan la

wadaageyo. Waa joojin kartaa ogolaanshahaaga waqti kasta.

6. Ma arki karaa warbixinteyda caafimaad?

Sida badan, waad arki kartaa warbixintaada. Waxaad qoraal uga codsankartaa shaqaalaha xog ilaalinta, si aad u aragto ama aad nuqul uga hesho (arag warbixinta xiriirka ee bogga 4). Waxad sidoo kale codsan kartaa koobiyada warbixinta oo elektaroonig ah ee aan elektaroonig ahaan u hayno. Amaanka ama sabab kale oo sharci ayaa xadidi karta warbixinta aad arkaysid. Waxaan kuugu koobiyaynaynaa qiimo macquul ah.

7. Ma bedeli karaa warbixinteyda caafimaad?

Hadii aad u maleyneyso in qeyb warbixintaada caafimaadka kamid ah eey qaldantahay, qoraal ayaad ku codsan kartaa in aan saxno ama aan ku darno warbixin cusub. Waxaad cosan kartaa in aan warbixinta lasaxay ama cusub u dirno cid kale oo naga heshay warbixintaada caafimaad.

Waxaa laga yaabaa in aanan bedelin ama ku darin haddii aragtideennu tahay in warbixintu saxtahay oo dhameystirantahay ama sababo kale. Haddii aanan kugu raacin in warbixintaada la bedelo, qoraal ayaan kuugu sheegeynaa, sababta aan kuugu raaciweynay. Sidoo kale diiwaankaaga waxa aan ku dareynaa in aad na weydiisatay bedelka warbixintaada annaguna aanan kugu raacin bedelka.

8. Ma weydiisan karaa AHS in eey koobto sida eey u adeegsaneyso ulana wadaageyso warbixinteyda caafimaad?

Waad codsan kartaa in aan koobno sida aan u adeegsaneyno ulana wadaageyno warbixintaada caafimaad. Codsigaagu waa in uu qoraal ahaadaa oo noogu sheegtaa koobidda aad dooneyso. Waan tixgelineynaa codsigaaga balse kuma qasbanin in aan ku raacno.

9. Ma codsan karaa in AHS igula xiriirto hab sir ah?

Waad codsan kartaa in aan kugula xiriirno qaabab macquul ah oo kalabedelan ama goobo kalabedelan. Codsigaagu waa in uu qoraal oo noogu sheegtaa goobta iyo qaabka aan kuula soo xiriiri karno. Waxaan isku deyeynaa in aan sharafno codsigaaga.

10. Ma heli karaa liiska waqtiyada AHS warbixinteyda caafimaad cid kale?

Waxaad naga codsan kartaa xisaab faahsan oo kusaabsan warbixintaada caafimaad. Waa in aad cosigaaga qoraal ka dhigtaa oo ku socda shaqaal xogururinta. Sharcigu nagama doonayo xaalad kasta oo aan warbixintaada la wadaagnay. Tusaale, ma ahan in aan liiska ku darno waqtiyada aan warbixitaada ula daryeelka AHS, qarashbixn ama daryeel howlo daryeel caafimaad ama marka aan warbixintaada ku gudbinay codsi aad adigu saxiixday.

11. Ma la ii sheegi doonaa haddii lagu xadgudbo xuuqdayda sired ee warbixintayda caafimaadka?

Waxaan kugu soo wargalin doonaa qoraal ahaan haddii lagu xadgudbo warbixintaada caafimaad. Xadgudub wuxuu dhacaa marka uu qof ogalaansho la'aan arko, isticmaalo ama uu soo shaac bixiyo warbixin caafimaad oo dhowrsan isagoo u adeegsanaya qaab lid ku ah amaanka ama sirta warbixinta caafimaad

12. Waa kuwee shuruucda ay AHS raacdo ee ku haboon sirta warbixintayda

Waxaan raacnaa Xeerka La xisaabtanka iyo Gudbinta Caymiska Caafimaad 1996 ee Federaalka Health Insurance Portability and Accountability Act of 1996, oo loo yaqaan HIPAA.
Sidoo kale waxaan raacnaa sharci kasta oo federal ama gobol oo ku siinaya ilaalin asturnaansho oo ka ballaaran kan HIPAA, markasta oo eey hirgelayaan. Tusaale, waxaan raacnaa sharciga sirta ee quseeya barnaamijada la tacaalidda adeegsiga maandooriyaha, 42 CFR Qeyb 2, iyo sharciyada sirta ee quseeya diiwaannada caafimaadka dhimirka, 18 VSA § 7103.

12. Ma heli karaa nuqul wargelintaan?

Haa, xaq ayaad u leedahay nuqul warbixintaan. Waad naga codsan kartaa nuqul goor kasta. Nooc elektoronik ah ayaa ku jira boggeenna, www.humanservices.vermont.gov.

13. AHS ma bedeli kartaa dhaqamadiisa asturnaansho?

Annaga ayaa heysanna xaqa bedelidda dhaqamadeenna asturnaansho iyo wargelintaan. Bedel kasta oo dhaqamadeenna asturnaashaha waxa uu ku dabaqmayaa warbixintaada aan heyno iyo warbixinta aan mustaqbalka kaa helno. Wargelin kasta oo cusub nuqul ayaan ka dhigi doonnaa, www.humanservices.vermont.gov, adigana farriin ayaan kuugu soo gudbin doonnaa.

14. Yaan la xiriiraa haddii aan su'aal ka qabo wargelintaan?

Fadlan la xiriir shaqaalaha xogururinta **Privacy Officer** talefanka ah802-241-0189 ama farriin ugu dir:

AHS Privacy Officer
Office of the Attorney General
HC 2 North
280 State Drive
Waterbury VT 05671-2080

15. Sidii u caban karaa haddii aan aaminsanahay in xuquuqdeyda asturnaansho lagu xadgudbay? Waxaad u caban kartaa shaqaaleheenna xoguruinta hab qoraal ama talefan. waxaad kaloo u caban kartaa xafiiska Civil Rights, DHHS, JFK Federal Building Room 1875, Boston, MA 02203.

Lagaagama aarsan doono in aad cabasho gudbisay. Faa'iidooyinka ama adeegyada aad hesho ma saameyn doonto cabasho kasta oo aad u gudbiso shaqaalaha xogururinta AHS ama xafiiska Xuquuqda Madaniga.

Xadgudubyada 42 CFR Qeyb 2 (sharciga sirta ee khamrada iyo daroogada) waa dambi. Ku xadgudubka qaanuunkan oo laga shakiyo waxaa loo gudbin karaa Xeer ilaaliya United States Attorney ee jooga degmada xadgudubku ka dhacay.

DHAQANNADA ASTURNAANTA LA XARIIRA WARBIXINNADA SI SHAQSIYEED LOO AQOONSANKARO

Waxaa sii dheer dhaqannada asturnaanta warbxinnada caafimaad, AHS waxay leedahay sharciyo ku aadn sir-heynta warbixin tilmaamaysa shaqsiga aan u fidinayno faa'idooyinka iyo adeegyadda.

Waa maxay warbixinta shaqsi ahaan loo aqoonsankaro?

Tani waa warbixin ay sameysay ama heshay AHS ama kuwa la shaqeeya heleen ama kuwa gacan siiya oo tilmaamaysa ama tilmaami-karta qof faa'ido ka qaata ama adeeg ay u fidiso AHS. Tusaalooyinka lagu ogaankaro warbixinadan waa:

- Magaca
- Lambarka Ilaalada Bulshada (Social security number)
- Taariiqda dhalashada
- Ciiwaanka
- Telefoon labarka

Goormee ayay AHS cidkale la wadaagtaa ama bixisaa warbixintayda aqoonsi iyadoon fasax iga haysan?

Waa ay dhacdaa in aan cidkale la wadaagno ama bixin karno warbixintaada aqoonsi iyadoon fasax lagaa qaadan sababo la xariira sidaan barnaamijka u maamulno awgeed. Barnaamijka habka loo maamulo waxaa loola jeedaa dariiqyadda loo maro si lagu dhaqan gelsho wax qabadka AHS oo wuxuuna ka koobanyahay:

- Abuurka U qalmitaan iyo cabirka adeegyadda iyo gargaarka aad adiga buuxsatay, ayna ka qeyb yihiin aqoonsiga (identification) iyo iskuduwidda adeegyadan ee AHS iyo kuwa la shaqeeya ama maalgelsha.
- Qorsheynta, bixinta, u diyaarinta, maalgelinta, ama qarash ka bixinta adeeg ama caawinaad shaqsi ama qoys dhan.
- Iskuduwidda ah Faa'idooyinka.
- Baarista musuqmaasuq iyo xadgudubadda.
- Meelmarinta qalad ka ilaalinta iyo hormarinta howsha socota.
- Ka warcelinta Xaalad degdega, iyo Masiibo mee ay ka dhacday gargaariddeed.
- Ku dhaqanka sharciyadda faderaaliga iyo gobolka ah, shuruudaha warinta iyo deeqbixinta.

Goormee ayay AHS u baahantahay inay fasax kaa qaadato kahor inta aynan eed to have my permission before sharing or disclosing my identifiable information?

Waxaan u baahanahay fasaxaaga oo qoraal ah hadaan cidkale la wadaagayno ama siineyno warbixintaada si aan:

- U qiimeyno u qalmitaankaaga adeegyada aan ka aheyn kuwa aad markaas xareysay.
- Ugu raadino adeegaaga adeeg bixiyayaal uunan naga dhaxayn heshiis ganacsi ama mid maalgelin.
- Lagala tashto dad khibrad leh oo ka baxsan AHS si looga faa'idaysto wax qabadkooda.
- La wadaagno qof aad xulatay.

Hadii aadan fasax noo siinin howlaha kor ku xusan,ma awoodikarayno inaan adeegyada aad mudantahay oo buuxa.

Qirsanaansho

Waxaan halkaan ku qirayaa inaan helay koobi ogaysiiskaan ah.

Taariiqda: _____ _____

(Shaqsiga saxiixiisa ama saxiixa qofkuu wakiishay)